



Ku soo dhawow!



Waa hadalka qaar ka mid ah waaliinta ka qayb galay Waalidnimada Iswiidhan.

Way fiican tahay in la sheekaysto oo la barto kalmado cusub

Hooyo, 24 jir

Suaaluhu way fiican yihiin

Hooyo, 47 jir

Mowduucyo xiiso leh

Aabo, 45 jir

Kulan kooxeedku waxay ahayd mid xiiso leh

Hooyo, 32 jir

Cidi kamay hadlin Xeerka Xuquuqda Carruurta mar hore

Hooyo, 38 jir

Macluumaad dheeraad ah

Waalidnimada Iswiidhan

In waalid lagu noqdo waddan cusub - macluumaadka bulsho oo kooxeed



Waalidnimada Iswiidhan

Inaad waalid ku noqoto waddan aan ahayn kii aad ku kortay waxay keeni kartaa su'aalo ku saabsan bulshada iyo nolosha qoyska.

Waalidnimada Iswiidhan waxa loogu talo galay waalidiinta dibadda ku dhashay ee leh carruur da'doodu u dhaxayso 0–18 sano oo raba in uu wax badan ka ogaado bulshada iswiidhishka.

Kulannada waalidku waxay ku saabsan yihiin nolosha qoyska ee dalka Iswiidan. Waxaan isticmaalaynaa qoraallo ay ka mid yihiin xeerka xuquuqda carruurta, kulamadana waxa lagu hoggaaminayaa wada hadal iyo suaalo. Waxaan wadaagaynaa khibradeheena iyo cilmi-baadhis.

Waxaad la kulmaysaa waalidiin kale oo aad ka hadlaysaan mawduucyo kala duwan shan jeer oo 2.5 saacadood ah.

Kulannada kooxaha waxaa hogaaminaya dad tabobaran, kowalba waxay ka kooban tahay 10-15 qof.

Barnaamijka waxaa soo saaray PLUS, Adeegyada Bulshada ee Stockholm iyadoo la kaashanaya Maamulka gobolka Stockholm.

Xogtan waxay ku saleysan tahay cilmi baadhis ku saabsan waalidnimada, Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta. Qoraalladu waxa kale oo ku salaysan yihiin baadhitaanada macluumaadka dadka dibadda ku dhashay ay ka rabaan Iswiidhan.



Stockholms
stad

Tusmada

Kulanka 1aad – Waalid dal cusub jooga

Kulanku wuxuu ku saabsan yahay sida bulshada Iswiidhen ay isbeddeshay, qoyska waddanka ku cusub iyo xilliga firaaqada ee ilmaha.

Kulanka 2aad – Dugsi, wiilal iyo gabdho

Sidee waalidku u taageeri karaan carruurta marka ay tagaan dugsiiga barbaarinta iyo dugsiiga? Miyaynu u kala eexannaa wiilasha iyo gabdhaha?

Kulanka 3aad – Caafimaad iyo Daryeel caafimaad

Maxaa caafimaadka qoyska u roon, maxaana la sameeyaa haddii qof xanuusanayo?

Kulanka 4aad – Xuquuqda iyo waajibaadka waalidka

Waa maxay taageerada aad heli kartaa waalid ahaan iyo xuquuqda ay leeyihiin caruurta? Sidee ayuu inoo saameeyaa walaaca nolol maalmeedku?

Kulanka 5aad – Waalidka carruur dhalinyaro ah haysta

Sidee u taageeri kartaa kureygaaga? Waxaan ka hadleynaa mowduucyada sida tubaakada, daroogooyinka, faldembi iyo jacaylka dhalinyarada.